

Norway oo gelaysa maalin caadi ah oo heegan sare leh

Dawladda ayaa go'aamisay in Norway u gudubto maalmo caadi ah oo heegan sare leh laga bilaabo Sabti 25-ka Sebtember sacaadda 16.00.

- Tirooyinka faafidda cudurku way sii yaraanayaan. Wuxuu istaagay kordhidda tirada dadka cisbitaallada la dhigo. Toddobaadyo aan badnayn ka dib waxa la filayaa in si buuxda loo tallaalay qaybo badan oo ka mid ah dadka Norway. Machadka Caafimaadka Dadweynaha ayaa aaminsan in ay yar tahay suurtagalmimada in cudurka safmarka ah uu xakamaha ka baxo, oo uu xanuun badan keeno islamarkaana uu culays ku keeno awoodda adeegyada caafimaadka. Taas darteed waxa aynu ku laaban karnaa nolol caadi ah. Waxannu joojin doonaa inta badan tallaabooyinkii ka hortagga cudurka, ayay tidhi raysalwasaare Erna Solberg.

Agaasinka Caafimaadka iyo Machadka Caafimaadka Dadweynaha (FHI) ayaa soo jeediyay in loo gudbo maalin caadi ah oo heegan sare leh marka la gaadho kala wareegga bilaha Sebtember iyo Oktoober. Ka dib markii ay si dhow u la socotay sida ay xaaladdu ahayd toddobaadkan, ayay dawladdu go'aamisay in Sabti 25-ka Sebtember saacadda 16.00 loo gudbo maalin caadi ah oo heegan sare leh .

- Inkastoo dadka badankiisu ku soo laabanayo noloshii caadiga ahayd, haddana cudurkii safmarka ahaa weli ma dhammaanin. Dad ayaa weli xanuunsan doona markaa taas darteed waxa muhiim ah in qof kasta is tallaalo. Islamarkaana waxa bulshadu ku jiri doontaa heegan sare oo si degdeg ah ayaa tallaabooyin loo soo rogi karaa haddii xaaladdu is beddesho. Degmooyinku weli door muhiim ah ayay ku leeyihii tallaabooyinka la qaadayo marka cudurka oo meel ka dillaacay culays ku keenayo adeegyada caafimaadka, ayay hoosta ka xarriiqday Erna Solberg.

Xeerarkan iyo talooyinkan ayaa jiri doona marka la galo *Maalin caadi ah oo heegan sare leh*

Marka aynu u gudubno maalin caadi ah, waxa meesha ka baxaya dhammaan xayiraadhiin ka jiray waddanka gudahiisa, marka laga reebo shardiga ku saabsan in gooni loo baxo haddii la qabo covid-19. Arrintani waxay dhaqangalaysaa laga bilaabo Sabti 25-ka Sebtember saacadda 16.00.

– Mitirkii la kala fogaanayey meesha ayuu ka baxayaa. Wixii hadda ka dambeeyaa waxa loo wadajoogi karaa si caadi ah.

Waxa la joojinayaa xadidnaantii tirada dadka qabanqaabo wadajoogi kara.

Waxa meesha ka baxaya shardigii ahaa miis-ugu-geynta iyo joojinta dadka ee khuseeyay goobaha laga cabو/cunteeyo, ayay tidhi Solberg.

Haddii aad isku aragtid calaamadaha infekshannada hawo-mareennada, waxa weli wacan inaad tijaabo iska qaado. Xataa haddii aad tallaalan tahay.

Haddii aad qaaddo koroonaha, waa inaad gooni uga baxdid dadka si aanad cudurka u sii faafin. Arrintani maaha soo-jeedin, ee waa xeer jira oo keeni kara in lagu ganaaxo haddii aad ku xadgudubto. Waxa la soo jeedinayaa in qofka aan tallaalmayn ee la deggan qof cudurka laga helay, uu tijaabo iska qaado ama karantiil galo. Arrintani ma ku xidhna in qofku isku arko calaamadaha cudurka. Dadka kale ee aan iyaguna tallaalmayn ee u dhawaaday qofkaas ma u baahna in ay karantiil galaan, laakiin waxa wacan in ay tijaabo iska qaadaan.

– Waxa sii socon doonaa talooyinkii aynu sida wacan ula qabsanay: In gacmaha la nadiifiyo marar badan, in lagu qufaco maro ama laabka suxulka iyo in guriga la joogo haddii la xanuunsado, ayay tidhi Solberg.

Inkastoo hadda meesha laga saarayo inta badan habraacyadii u degsanaa noocyada kala duwan ee meheradaha/shirkadaha iyo tilmaamihii ka-hortagga cudurka, haddana waxa ay meheradaha ku boorinaysaa in ay sii wadaan nidaamyadoodada wacan ee cudurka lagaga hortagayo, si macmiishoodu ay tusaale ahaan u heli karaan alkolada gacmaha lagu nadiifiyo.

– Waxa sii jiri doona nidaamka ku salaysan nalka samaanfalaha waddooyinka ee loogu talagalay iskuullada iyo xannaanooyinka. Haddii degmo ay garato in xaaladda faafidda cudurku tahay mid loo baahan yahay in la soo saaro go'aan ku

saabsan tallaabooyin heer degmo ah, waxa ay tilmaamo wacan ka helayaan nidaamka nalka samaanfalaha waddooyinka. Waa muhiim si ardaydu u helaan maalmo caadi ah ilaa intii suurtagal ah. Inkastoo tirada dadka tallaalan sii kordhayso, haddana waxa weli iman kara xalaado loo baahan yahay in la soo rogo tallaabooyin heer degmo ah, ayay sheegtay raysalwasaaruuhu.

- Marka warka la soo gaabiyo: Hadda waxaynu u noolaan karnaa si caadi ah, ayay Solberg hoosta ka xarriiqday.

Istiraatijiyadda ayaa wax laga beddelayaa

Istiraatijiyadda dawladda waxa ilaa hadda hadafkeeda guud ahaa in la xakameeyo cudurka safmarka ah. Laakiin maadaama dad badan ay tallaalan yihiiin, waxa isbeddelay aragtida ku saabsan waxa loo baahan yahay si loo xakameeyo cudurka. U wareegidda maalin caadi ah oo heegan sare leh ayaa macnaheedu yahay in Norway ka wareegayso istiraatijiyad kantaroolid ku salaysan, una wareegayso istiraatijiyad heegan ku salaysan.

- Hadafka cusub ee istiraatijiyadda dawladdu waa in laga hortago in cudurku keeno xanuun badan iyo culays badani oo ku yimaado awoodda adeegyada caafimaadka ee degmooyinka iyo cisbitaallada. Iyadoo islamarkaana la rabo in dadku helaan maalmo caadi ah. Waa in dadku heli karaan adeegyada dawladda iyo degmooyinka, waana in la ilaaliyo dhaqaalaha, ayuu yidhi Bent Høie wasiirka caafimaadka iyo daryeelka.

Afar muujiye ayaa la isticmaalayaa marka hay'adaha dawladdu qiimaynayaan inta uu le'eg yahay culayska cudurka ee loo baahan yahay in la maareeyo:

- Tirada dadka cisbitaallada la dhigay
- Tirada dadka la dhigay qaybaha cisbitaallada ee gargaarka degdegga ah lagu siiyo dadka aad u buka
- Da'da ay jiraan dadka cisbitaallada la dhigay
- Awoodda degmooyinka

Tirada dadka covid-19 qaaday muhiimad sidii hore ah ma lahaan doonto wixii hadda ka dambeeya, balse culayska guud ee imanaya marka lagu daro hargabka iyo fayrusta RS ayaa sii muhiimsanaan doona.

Heeganka wixii hadda ka dambeeya

– Wuxuu la joojinayaa inta badan tallaabooyinkii ka hortaga faafidda cudurka ee heerka qaran ahaa, islamarkaana degmooyinka ayaa yeelanaya masuuliyadda koowaad ee soo rogidda tallaabooyinka iyo soo saarista xeer-hoosaadyo heer degmo ah haddii xaaladdu sidaas farayso. Haddii cudurku si weyn uga dhex dillaaco oo aan sawir buuxa laga haysanin xaaladda jirta islamarkaana ay khatar ku imanayso awoodda degmooyinka, waxa tusaale ahaan loo baahan karaa in la soo rogo tallaabooyin loogu talagalay dadka nugul, sida dadka gabobay iyo dadka buka. Xidhiidh wacan ayaa noo dhxeeyay degmooyinka, oo af ahaan iyo qoraal ahaanba waannu ogeysiinay in ay heegan u ahaadaan soo saarista xeer-hoosaadyo heer degmo ah haddii loo baahdo, ayuu sheegay Høie.

Degmooyinku waa in ay wixii hadda ka dambeeya heegan u ahaadaan tijaabo-qaadista. Waa in ay toddobaad kasta tijaabooyinka degdegga ah u qaybin karaan boqolkiiba 10 dadka degmada deggan, waa in ay toddobaad kasta tijaabo ka qadii karaan boqolkiiba 1 dadka degmada deggan isla markaana waa in ay toddobaad gudahii kordhin karaan awooda tijaabo-qaadista oo ka dhigi karaan boqolkiiba 5. Islamarkaana waa in ay weli awoodi karaan in ay toddobaad kasta tallaali karaan 200 000 qof iyagoo islamarkaana afar toddobaad gudahood aad u kordhin kara awoodda tallaalista.

Laamaha caafimaadka ee gobolladu waa in ay diyaar u ahaadaan in cisbitaallada la dhigi karo bukaan badan oo qaba covid-19 iyo cudurro kale oo la is qaadsiyo, in ay shaybaadhyadu samayn karaan baadhitaano badan iyo in shaqaale badan shaqada ka maqnaan karaan cudur dartii.

– Waddanka waxa ka jira nidaamyo wacan oo keenaya in si dhakhso ah loo ogaan karo cudur meel ka dillaacay iyo noocyoo cusub oo fayrus ah, laakiin dabcan waa in degmo kasta la socoto xaaladda ka jirta degmadeeda. Wuxaan oo dhan waxa loo samaynayaa si loo maarayn karo xalaadda, haddii ay is beddesho. Dawladda ayaa go'aamisay in heeganka hadda lagu sii jiro ugu yaraan inta laga baxayo sannadkan. Waxannu soo jeedinaynaa in istiraatijiyadda dib loo eego

dhammaadka sannadkan. Laakiin waa in qof kasta ku talagalo in heeganku sarrayn doono xilliga qaboobaha 2022. Dawladdu waxay degmooyinka u ballanqaadday in dawladdu ka bixin doonto kharashka kaga baxa hawlahan, ayuu yidhi Høie.

Talooyinka iyo xeerarka heerka qaran ah ee jiri doona marka la galoo maalin caadi ah oo heegan sare leh

Marka inta badan talooyinka iyo xeerarka dawladdu ay meesha ka baxaan, waxa qof kasta dooran karaa sida uu isu ilaalinayo iyo tallaabooyinka uu ku dhaqmi doono. Joojinta tallaabooyinka, sida talooyinka iyo xeerarka heerka qaran ah, ma diidayaan in qofku si gaar ah isu ilaaliyo. Tusaale ahaan, qofka raba in uu si gaar ah isaga ilaaliyo infekshannada hawo-mareennada waxa uu dooran karaa in uu ka fogaado dadka kale islamarkaana isticmaalo af-dabool.

Tallaabo

Talooyin iyo xeerar

Nafaafadda gacmaha Gacmaha dhaq marar badan. Istimmaal saabuun iyo biyo ama dawada gacmo-nadiifiye alkahool ku jirto.

Nafaadda qufaca Istimmaal warqad/istiraasho ama laabka suxulkaaga markaad qufacaysid ama hindhisaysid. Tuur warqadda/istiraashada ka dibna dhaq gacmaha.

Talooyin ku saabsan calaamadaha infekshannada hawo-mareennada Talooyin khuseeya marka la isku arko calaamado cusub oo ah kuwa infekshannada hawo-mareennada (xummad/qandho, qufac, cune-xanuun, waayidda dareemida urta iyo dhadhanka, qofka oo dareemaya inuu xanuunsanayo):

- Guriga joog
- Iska qaad tijaabada covid-19. Arrintan waxay caadi ahaan khuseysaa dhallinyarada iyo dadka 18 sanno ka weyn. In caruurta tijaabo laga qaado waxa lagala tashan karaa waalidka, tusaale ahaan haddii ilmaha lagu arko calaamado cusub ka dib markii uu u dhawaaday qof cudurka laga helay.

Xilliga lagu laaban karo shaqo, iskuul iwm.:

- Waxa wacan in dhallinyarada iyo dadka 18 sanno ka weyn ay iska qaadaan tijaabo covid-19 oo cudurka laga waayey ka hor intaanay ku laaban.
- Haddii calaamaduhu si buuxda u tagaan hal maalin ka dib, waa lagu laaban karaa shaqo iyo iskuul.
- Haddii calaamaduhu sii jiraan waxa wacan in guriga la joogo ilaa inta caafimaad la dareemayo, oo calaamaduhuna sidii hore ka soo yaraanayaan islamarkaana xummad/qandho la'aan la ahaa 24-kii saacadood ee u dambeeyay, iyadoo aan la isticmaalin dawooyin xanuun baabiiye ah. Inta badan waxa habboon in qofku guriga joogo labo maalmood.
- Haddii la qabo calaamado khatar ah ama kuwo aan tegayn, la xidhiidh dhakhtar si laguu eego.

Marka lagaa waayo covid-19, islamarkaana aad qabto calaamado khafiif ah oo aan saamayn ku yeelanin caafimaadkaaga, ma u baahnid inaad joogto guriga. Dhallinyarada iyo dadka ka weyn 18 sanno way ku laaban karaan iskuulka/shaqada marka ay soo roonaadaan ama isla maalinta tijaabada laga qaaday haddii calaamadihii sababay in tijaabo laga qaado markoodii hore ahaayeen kuwo khafiif ah oo aan la hubin. Waad ku laaban kartaa iskuulka/shaqada inkastoo aad weli qabto calaamadaha cudurka ee qofka ku dambeeyaa sida sanka oo dareera ama qufac fudud. Waxa dhici karta in ay jiraan xeerar u gaar ah shaqaalaha caafimaadka ama qaar ka mid ah xirfadaha kale.

U gaar ah carruurta aada xannaanada carruurta ama jirta da'da lagu aado dugsiyada hoose:

Carruurta duuf leh ama sanku cabudhsan yahay ama qabta calaamadaha dhibaatooyinka hawo-mareennada oo soo jiitamay ma u baahna in ay guriga joogaan. Carruurta qabta calaamado ku cusub sida xummad/qandho, qufac, cune xanuun ama caafimaad-darro dareemaya, waxa u wacan in ay guriga joogaan, laakiin

xannaanada/iskuulka way aadi karaan markay soo roonaadaan. Wuu aadi karaa xataa haddii ilmuu weli qabo qaar ka mid ah calaamadaha, sida sinka oo dareeraya ama qufac fudud.

Tijaabo-qaadis

Waxa la soo jeedinaya in ay tijaabo iska qaadaan dadkan:

- Qof kasta oo isku arka calaamadaha cudurrada hawo-mareennada oo ku cusub ama calaamadaha kale ee covid-19, iyadoo aanay ku xidhnayn in uu tallaalan yahay iyo in kale
- Dadka aan tallaalmayn ee guriga la deggan ama si kale ugu dhow qof cudurka laga helay
- Dadka kale ee aan tallaalmayn ee u dhawaaday qofka

Waa la joojin doonaa tijaabo-qaadistii joogtada ahayd ee la balaadhiyay. Haddii cudurku meel ka dillaaco waxa la isticmaali karaa tijaabo-qaadis la joogtaynayo wakhti xaddidan. Haddii cudurku si weyn u dillaaco waxa habboonaan karta in tijaabooyinka la joogtaynayo loo qaado hab waafaqsan tilmaamaha FHI. Markan oo kale waxa la soo jeedinayaa in la isticmaalo tijaabooyinka qofku iskii iska qaadayo.

Haddii cudurka lagaa helo ka dib marka aad tijaabo iska qaaddo, waxa la soo jeedinayaa in tijaabo PCR ah la iska qaado si loo hubiyo natijada tijaabada.

Gooni-u-bixidda qofka

cudurka laga helo

Waxa shardi ah in dadka laga helay covid-19 ay gooni-u-bixid galaan. Xataa qofka tallaalan. In gooni loo baxo waxa ay tahay in qofku gurigiisa ama meel kale oo habboon joogo, oo gooni uga baxo dadka kale, xataa dadka uu guriga la deggan yahay haddii ay suuragal tahay.

Dadka gooni-u-bixid ku jira ee guriga jooga waxa ay gooni-u-bixidda joojin karaan haddii 5 maalmo ka soo wareegtay markii ugu horreysay ee ay isku arkeen calaamadaha cudurka oo ay

islamarkaana ugu yaraan 24 sacaadood ahaayeen xummad/qandho la'aan iyagoo aan isticmaalin dawooyin xummada yareeya. Haddii qofka cudurka laga helay aanu si buuxda u tallaalmayn islamarkaana aanu qabin calaamadaha infekshannada hawo-mareennada, waxa tirinta 5-ta maalmood laga bilaabayaa maalinta tijaabada la qaaday. Dadka si buuxda u tallaalan ee aan qabin calaamadaha infekshannada hawo-mareennada ma lagula talinayo in ay tijaabo iska qaadaan. Laakiin haddii ay tijaabo iska qaadaan oo cudurka laga helo, waxa wacan in ay galaan gooni-u-bixid 2 maalmo ah si loo eego in calaamaduhu ku yimaadaan.

**Raadraacidda
cudurka**

Waxa wacan in hawlaha raadraacidda ee degmooyinka lagu koobo dadka qofka guriga la deggan ama si kale ugu dhow, sida saaxiib/saaxiibad.

Haddii cudurka lagaa helo ama ilmahaaga laha helo waxa lagugu boorinayaa in aad ogeysiisid dadkii loo dhawaaday kuna boorisid in ay tijaabo iska qaadaan.

Xarumaha caafimaadka iyo daryeelka iyo meelaha bixiya adeegyada guriga qofka lagu siiyo (hjemmetjenester) waxa u wacan in ay raadraacidda u fuliyaan hab waafaqsan tilmaamo u gaar ah.

**Talooyin ku socda
qofka u dhawaaday
qof cudurka laga helay**

Dadka aan tallaalmayn ee guriga la deggan ama si kale ugu dhow qof cudurka laga helay, waxa loo soo jeedinayaa in aanay dadka kale u qof cudurka laga helay dhawaanin 7 maalmo ama in ay tijaabo iska qaadaan.

Haddii aanad mar kale u dhawaanin cid cudurka qabta, waxaad iska ilaalinta u dhawaanshaha dadka ku beddeli kartaa in aad wakhtiyoo joogto ah tijaabo iska qaado. Waxa qofku kala dooran karaa:

1. Inuu iskii tijaabo iska qaado muddo 7 maalmo ah
 2. Inuu tijaabo PCR ah iska qaado maalin dhaaf muddo 7 maamlo ah
- Dadka tallaalan ee guriga la deggan ama si kale ugu dhow qofka cudurka laga helay ma u baahna in ay dadka kale iska ilaaliyaan, laakiin waxa wacan in ay tijaabo iska qaadaan haddii ay isku arkaan calaamado.

Dadka u dhawaaday qof cudurka laga helay, laakiin aan guriga la degganayn ama aan si kale ugu dhowayn waxa lagu boorinayaa:

- In ay tijaabo iska qaadan sida ugu dhakhsaha badan marka loo sheego in ay u dhawaadeen qof cudurka laga helay.
- In ay yareeyaan la joogista dadka kale ilaa inta la helayo jawaabta tijaabada oo sheegaysa in cudurka laga waayey
- In ay si wacan ula socdaan in wax calaamado ah ku yimaadaan 10-ka maalmood ee hore ka dib markii ay qofka u dhawaadeen
- In aanay isku adkaynin in ay tijaabo iska qaadaan haddii ay mar kale isku arkaan calaamado

Dhakhtarka degmada ayaa samayn kara qiimayn ku saabsan isticmaalka iyo soo jeedinnada ku saabsan karantiilka.

Af-dabool

Soo-jeedinta/waajib ka dhigidda isticmaalka af-daboolka wuxu ahaan karaa tallaabo heer degmo ah oo la isticmaali karo markii loo baahdo. Adeegyada caafimaadka ayaa af-daboolku u yahay tallaabo muhiim ah oo lagaga hortagi karo cudurka.

Xog

Talooyin iyo xeerar muhiim ah oo meesha ka baxaya laga bilaabo 25-ka Sebtember

- Shardiga kala fogaanshaha hal mitir meesha ayuu ka baxayaan.
- Ma jirto wax xadidnaan ah oo saaran sida dadku u wada joogaayaan ama qabanqaabooyinka.
- Ma jirayo shardi ku saabsan in qofka miiska loogu geeyo cuntada/cabitaanka ama in la joojiyo dadka soo galaya goob cunto/cabitaan.
- [Xayiraadaha soo gelidda waddanka waxa loo qaadayaa si tartiib-tartiib ah.](#)
- [Talooyinka guud ee ku saabsan safarrada dibedda waxa la joojinayaa 1-da Oktoober](#)

Talooyin iyo xeerar jiri doona marka la galo maalin caadi ah oo heegan sare leh

- Gacmaha nadiifi, ku qufac istiraasho ama laabka suxulka oo guriga joog haddii aad isku aragto calaamadaha cudurrada hawo-mareennada ama xummad.
- Waa in aad gasho gooni-u-bixid haddii lagaa helo covid-19.
- Haddii aad isku aragto calaamadaha cudurrada hawo-mareennada, waxa weli wacan in aad tijaabo iska qaaddo. Xataa haddii aad tallaalan tahay.
- Qofka aan tallaalnayn ee guriga la deggan qof cudurka laga helay, waxa lagula talinayaa inuu tijaabo iska qaado oo karantiil galo, iyadoo aan loo eegayn inuu qabo calaamado iyo in kale. Dadka kale ee aan tallaalnayn ee qofka u dhawaaday ma u baahna in ay karantiil galaan, laakiin waxa wacan in ay tijaabo iska qaadaan.
- [Nidaamka ku salaysan nalka samaanfalaha waddooyinka ee loogu talagalay iskuullada iyo xannaanooyinka ayaa ilaa go'aan dambe sii ahaan doona hab la isticmaali karo markii loo baahdo haddii xaaladdu sidaas sheegto](#)

Heeganka heer degmo, heer gobol iyo heer qaran

Afar muujiye ayaa la isticmaalayaa marka hay'adaha dawladdu qiimaynayaan inta uu le'eg yahay culayska cudurka ee loo baahan yahay in la maareeyo:

- Tirada dadka cisbitaallada la dhigay
- Tirada dadka la dhigay qaybaha cisbitaallada ee gargaarka degdegga ah lagu siiyo dadka aad u buka
- Da'da ay jiraan dadka cisbitaallada la dhigay
- Awoodda degmooyinka

Degmooyinka cudurku si weyn uga dhex dillaaco ee aan sawir buuxa ka haysanin xaaladda jirta islamarkaana ay khatar ku imanayso awoodda degmada, waa in ay diyaar u ahaadaan in ay soo saaraan xeer-hoosaadyo heer degmo ah.

Degmooyinku waa in ay heegan u ahaadaan in ay tijaabo qaadis badan sameeyaan. Waa in ay toddobaad kasta tijaabooyinka degdegga ah u qaybin karaan boqolkiiba 10 dadka degmada deggan, waa in ay toddobaad kasta tijaabo ka qaadi karaan boqolkiiba 1 dadka degmada deggan isla markaana waa in ay

toddobaad gudahii kordhin karaan awoodda tijaabo-qaadista oo ka dhigi karaan boqolkiiba 5. Islamarkaana waa in ay weli awoodi karaan in ay toddobaad kasta tallaali karaan 200 000 qof iyagoo islamarkaana afar toddobaad gudahood aad u kordhin kara awoodda tallaalista.

Laamaha caafimaadka ee gobolladu waa in ay diyaar u ahaadaan in cisbitaallada la dhigi karo bukaan badan oo qaba covid-19 iyo cudurro kale oo la is qaadsiyi, in ay shaybaadhyadu samayn karaan baadhitaano badan iyo in shaqaale badan shaqada ka maqnaan karaan xanuun dartii.

Dhanka heerka qaran waxa ka jiri doona nidaamyo wacan oo keenaya in si dhakhso ah loo ogaan karo cudur meel ka dillaacay iyo noocyoo cusub oo fayrus ah, islamarkaana waa in degmo kasta si wacan ula socoto xaaladda ka jirta degmadeeda. Waa in heeganka maanta lagu sii jiro ugu yaraan inta laga baxayo sannadkan, waana in qof kasta ku talagalo in heeganku sarrayn doono xilliga qaboobaha 2022.

TISK la fududeeyay laga bilaabo 27-ka Sebtember

TISK la fududeeyay (tijaabo-qaadis, gooni-u-bixid, raadraacidda, karantiil) ayaa ka dhigan in ay yaraan doonaan dadka karantiil gelaya iyo hawlahaa raadraacidda cudurka ee degmooyinka. Karantiilku wuxu noqonayaa waxa lagula talinayo dadka ugu nugul dhanka cudur-qaadista: Dadka guri wada deggan ama si kale isugu dhow, oo islamarkaana aan tallaalmayn/si buuxda u tallaalmayn.

Dadka kale ee u dhawaaday qofka cudurka laga helay ma u baahna in ay galaan karantiil. Raadraacidda dadka cudurka laga helo waxa lagu soo koobayaan dadka qofka u dhawaaday ee guriga la deggan ama si kale ugu dhow.